Caawinta Dadka (Supporting People)

- **Cada aan nahay anagu**
- **Adeegyo noocee ah ayaan dadka u soo gudbinaa**
- **Macluumaad ku saabsan sida aad u heli karaysid macluumaadkaas ayaga oo bilaash ah**
- **Sida aad racfaan ooga qaadan karaysid go'aan**

Maxay tahay qabtan lagu magacaabo Caawinta Dadka?
Qaybtan loogu magacaabo Caawinta Dadka (Supporting People) waa koox dad ah oo ulajeedadoodu tahay inay ku caawiyaan oy nolosha kuu fududeeyaan kagana dhigaan mid farxad leh.

Kawnsalaka Haringey ayaa waxa uu isu keenay dad ka kala socda ururo kale duwan si ay gacan kaaga siiyaan inay noloshaadu noqoto mid fiican. Sidaas darteed waxay kooxdani u baahan tahay inaad u sheegtid dhibaatooyinka ku haysta si ay gacan kaaga siiyaan, sida haddii aad caawin ooga baahan tahay helista guri aad ku noolaatid, inaad sii daganaatid meeshaada oyna dhicin in lagaa saaro ama haddii aad caawin ooga baahan tahay shaqo helista.

Ururada ay kooxdana ka kooban tahay waxay kala yihiin Qaybta Caafimaadka ee Haringey iyo Adeega Tijaabada London.
Kooxdan Caawita Dadku (Supporting People) waxay jeceshahay inay dadka gacan ka siiso sidii inta awoodooda ah ay naftooda u caawin lahaayeen.

Adeegyada aan dadka u soo gudbinaa waxay u qaybsan yihiin labo qaybood: adeegyo ku eg mudo gaaban iyo adeegyo mudo dheer socon.

Adeegyada ku eg mudo gaaban ayaa ah kuwo bilaash ah. Meesha adeegyada mudada dheer socon ay yihiin yihiin lacag. Qoraalkan waxaad ka ogaan adeegada nooca mudada dheer socon. Akhri kadibna isku day inaad ogaatid sida aad u bixin karaysid lacagta ku baxi helista adeegyadaas.

Waxaaba dhici karaysa inaad adigu bixin lagacta ku bixi adeegyad mudada dheer. Qoraalkani waxuu kuu sheegi nooca dadka aan looga baahnayn inay bixiyaan lacagta, waxaa kale oo qoraalku kuu sheegi sidii aad adeegyadaas bilaash aad ugu heli lahayd.

Si kasta oy xaaladaaddu tahay waa inaad buuxisid foomka Qaybta Sooshaalka ee lagu magacaabo (Fairer Charging Assessment form). Waxaadna foomka ka heli karaysaa hantiilaha gurigaaga, ururada dadka caawiya amaba inaad anaga si toos ah nooga soo qaadatid:

Cinwaanku waa:
✉: Supporting People Team, Supporting People, 40 Cumberland Road, London N22 7SG
☎: 020 8489 3379
@: supporting.people@haringey.gov.uk

Haddii aad caawin ooga baahan tahay buuxinta foomka, waxaad waydiisna kartaa qaybta ku caawisa amaba Kooxda Caawinta Dadka inay gacan kaasiiyaan buuxinta foomka.

Lacaga ay Qaybtan Caawinta Dadka ku dalacdo adeegyada guryaha dartood
Sida caadiga ah lacaga ku saabsan adeegyada aad isticmaashid ayaa waxay ku jiraan kirada guriga.

Maxay yihiin adeegyada mudada dheer?
Caawinta socon in kabadan mudo labo sano ah ayaa waxay tahay caawinta mudo dheer. Meesha caawinta mudo labo sano ah iyo wixii kayar ay tahay caawin mudo gaaban. Caawintan ayaa ah mid bilaash ah oon lacag kaaga baahnayn.

Caawinta mudada dheer waxaa kamid ah:
- Guryaha dadka waawayn lagu hayo
- Qaar kamid ah adeegyada ay helaan dadka qaba dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda
- Qaar kamid ah adeegyada ay helaan dadka qaba dhibaatooyink waxbarashada
- Caawin lasiin dadka naafada ah amaba qaba dhibaatooyin laxidhiidha maskaxda
- Adeegyo loogu tala galay dadka leh dhibaatooyinka laxidhiidha maandooriyaha iyo khamrida
- Adeegyo loogu tala galay dadka qaba cudurka HIV ama AIDS.

Maxay qaybta guryaha ee Haringey samaysaa si ay caawin u soo gudbiso?
- Waxaan ku baraynaa xirfado noloshaada guriga, shaqadaba iyo mark aaad dadka kala la kulantidba kaaga dhigi mid fudud.
- Waxaan kaa caawin karaynaa dalbashada lacagaha aad xaqa u leedahay, waxaan talo kaa siinaynaa sidii aad lacagahaaga si miisaaman aad ugu isticmaali lahayd oodan dhibaato dayn aadan u galin.
- Waxaad diyaar u nahay inaan gacan kaasiino helista meel aad dagtid aadna dagaan u heli lahayd.
- Haddii aad u baahatid inaad la kulantid dhakhtar, qof kasocda qaybta caafimaad amaba aad dad kale la kulmaysid, arinkan ayaan kaa caawinaynaa. Waxaa kale oon kaa caawinaynaa inaad dadka kale la kulantid si aadan markaas u dareemid cidlanimo.
- Haddii aad ubaahan tahay in shaqo laguu tababaro, arinkan gacan ayaan kaa siin karaynaa.

- Waxaan diyaarin karyaan qof guriga kuugu yimaada si uu u eego inaad bad qabtid.
- Waxaan kusiin naynaa “kanbaleel” haddii ay dhacdo inuu shala ka dhaci guriga amaba aad xanuunsatid amaba aad dareentid cabsi si aad kale aad u wargalisid arinkaas.
- Waxaa kale oon gacan kaasiinaynaa aadista iyo dhigashada koleej..

Cidee ayaan looga baahnayn inay kharashka ku bixi adeegayada mudada dheer bixso?
Dadka ay dawladu ka bixiso lacagta kirada guryaha loogama baahna inay bixiyaan lacagta kubixi adeegyada. Kawnsalka Haringey ayaa bixin lacagtaas ku bixi adeegyada aad heli, ayaga ayaan si toos ah u siin cida iska leh gurigaaga ama cida ku caawisa. Waxaad u baahan tahay inaad buuxisid foomka lagu magacaabo (**Fairer Charging Assessment form).**

Si aad u samaysid codsiga in lagaa bixiyo ijaarka guriga ood ku heshid (Housing Benefit) laxidhiidha:
☎: 0845 071 2800
Booqo boga intarnedka: www.haringey.gov.uk

Haddii aad tahay qof aan laga bixinin kirada guriga oon qaadanin (Housing Benefit) waxaa dhici karaysa markaas inaad bixisid dhamaan ama qaar kamid ah kharashka ku baxi adeegyada.
Waxa dhici karaysa inuu Kawnsalka kaabixiyo lacta ku baxi adeegyada. Waxaad u baahan tahay inaad buuxisid foomka lagu magacaao (**Fairer Charging Assessment)** si aan markaas u fiirino oon qiimayn ugu samayno sida aan kuu caawin karayno.

Muxuu yahay foomka lagu magacaabo (Fairer Charging Assessment)?
Haddii Qaybta Adeega Guryaha iyo Adeegyada Daryeelku ay kuu diyaariyaan daryeel ama caawin ku saabsan arimaha guriyaha, waxaa lasamayn qiimayn taas oo laysku dari kharashka ku bixi adeegyadaada si markaas lacagta dhabta ah ee adeegyada laguugu soo dalaco. Bixin maysid inta awoodaada ah wax kabadan.

Si markaas laguugu soo dalaco lacagta saxda ah ee adeegyadaada waa inaad buuxisid foomkan asaga ah

Sida aan go’aan kaga gaadhi kharashka saxda ah ey tahay inaad bixisid
Qiimaynta ku saabsan ku dalicista lacag Cadaalad ah (Fairer Charging Assessment) waa mid loo eegi dakhliga qofka soo gala. Waxaan eegaynaa lacgta ubuuckasta kusoo gasha inta ay tahay, iyo lacagta aad usbuuc kasta kharash garaysid.

Waxaad u baahan tahay inaad na tustid cadayn:

- Lacagta usbuuc kasta soo gasha dadka ku nool gurigaaga inta ay tahay. Tusaale ahaan lacagta kaa soo gasha shaqo aad samaysid, ama lacag aad ka heshid hawlgabnimo gaar ah ama lacgaha ay dawladu ku siiso

- Lacago aad adigu leedahay, ama mid aad sheer ku leedahay oy ku jiraan lacagaha kaydka kuu ah.
- Lacga ubuuc kasta aad kharash garaysid. Tusaale ahaan inta aad u bixisid ijaarkaaga, gurigaaga iyo lacta Canshuurta Guryaha.

Su'aalo la xidhiidha racfaan qaadashada
Haddii aad heshid warqad marka aan go'aan gaadhnay lacgta aan kugu dalici.
Haddii ay markaas kuula muuqato in lacgtaas ay tahay mid khalad ah, waxaad go'aanka waydiin karaysaa Kooxda Qiimaynta Dhaqaalaha. Haddii aadan wali nagu raacsanayn go'aankaas asaga, waa inaad markaas noo sheegtaa si arinkaaga go'aankaas uu u fiiriyo qof madax ah oo sare.

Sida racfaanka loo qaato
Haddii aadan ku farsanayn go'aanka, waa inaad markaas nasoo wargalisaa, adiga oo qoraal arinkaas noogu soo sheegi, noogunas oo hagaajin cinwaankan:
✉: Supporting People Team, Supporting People, 40 Cumberland Road, London N22 7SG
☎: 020 8489 3379
@: supporting.people@haringey.gov.uk

Waa inaad magacaago noo sheegta ood waliba sheegta sababta ay kuula muuqato in go'aankanagu uu yahay mid khalad ah. Gudi dad ah oo ka kala socda Kawnsalka Haringey iyo urur ka baxsan oo la socda qorshaha darteelka bulshada ayaa racfaankaaga dhagaysan.

Haddii aadan adigu awood u lahayn inaad samaysid racfaanka, waa inaad markaas qofka ku caawiya ama qof kale oo caadi ah aad waydiisatid inuu gacan kaa siiyo racfaan qaadashada.

Mudo intii dhan ayay qaadan inaan jawaab ka helo racfaanka ama su'aalaha?
Haddii ay suurogal noqoto, Kawnsalku mudo labo usbuuc gudahood ah ayuu kugu siin jawaab kadib markii aad waydiisatay in arinkaaga dib u eegis lagu sameeyo.

Haddii ay dhacdo in arinkaagu uu aado gudida racfaanka, waxaan isku dayaynaa inaan mudada dhagaysiga racfaankaaga aan kuu soo sheegno mudo lix usbuuc ah gudahood oo laga bilaabo xiligii ay dacwadaadu nasoo gaadhay.

Mudo yar dhagaysiga ka dib ayaa waxaa laguu soo diri qoraal. Haddii markaas ay gudidu go'aansato in lacgtaas lagugu dalacay ay ahayd mid khalad ah, waxaa markaas laguu soo diro cadayn ay ku qoran tahay qiimaha cusub ee lagugu dalici.

Haddii aadan wali go’aankaas ku qanacin
Xaq danbe ooguma lehid Kawnsalka dhexdiisa inaad sii qaadatid racfaan. Lakiin ay kula tahay in si aan cadaalad ahayn laguula dhaqmay, waxaad cabasho qoraal ah u soo gudbin karaysaa cinwaankan:

✉: The Local Government Ombudsman
21 Queens Gate
London
SW1H 9BU